



Kulanka dhageysiga Guddiga ee dugsiyada dhexe

Fadlan ku soo biir Guddiga PPS kaasi oo loogu talagalay kulanka dhageysiga furitaanka laba dugsi dhexe oo cusub ee Harriet Tubman iyo Roseway Heights.

Goorta: 5:30-6:30 galabnimo, Talaado, Sibtambar 12

Goobta: Maqaayada Dugsiga Sare ee Madison, 2735 NE 82nd Ave., Portland, 97220

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay u wareegayaan habka dugsiyada dhexe ah oo loogu talagalay ardayda fasallada 6-8 si ay fursado ballaaran iyo barnaamijyo xoog leh u siiyaan arday badan oo dheeraad ah. Abriil, Guddiga PPS waxay degmada u tilmaantay in marka la gaaro dayrta 2018-ka ay laba dugsi dhexe ka furto Harriet Tubman iyo Roseway Heights. Degmadu waxay dejisay qaab loogu talagalay waxbarashada fasalka dhexe oo tusaale ah, iyada oo ka shaqaynaysa hirgelinta qaab wax la isku siiyo oo tiro ka mid ah dugsiyada K-8 loogu bedelayo dugsiyo ah K-5. Kulankani wuxuu noqon doonaa fursad lagu ogaanayo qorshaha ilaa hada jira isla markaana fikrada la qabo lagu siinayo Guddiga.

Ogow: Daryeel carruureed ayaa la bixin doonaa. Turjubaano ayaa la heli doonaa.

Wixii macmuulaad dheeraad ah ee ku saabsan soo jeedinta la soo bandhigay ee dugsiyada dhexe booqo pps.net/middleschools.